Nationwide Children's
When your child needs a hospital, everything matters.

Helping Hand™ Health Education for Patients and Families

# Xiiq Dheerta (Qufac Dheer)
# Whooping Cough (Pertussis) (Somali)

Xiiq dheertu Waa caabuq ku dhaca habka neefsashada oo ay keentojeermis (bakteeriyo). Waxay sababtaa qufac daran oo ay daba socon karto 'xiiq dheer' oo cod sare leh.

## Sida xiiq dheertu u Faafto

Xiiq dheertu waxay ku faaftaa qof qaba oo kuu dhow oo kugu ak qufaca, hindhisa, qosla ama kuula hadlo si akdhawaansha ah. Waxay sidoo kale ku faaftaa marka la taabto shay ay dusha ka saaran yihiin jeermiska xiiq dheerta. Qof kasta oo da' kasta jira ayaa qaadi kara jeermiska xitaa haddii uusan u muuqan qof xanuunsan.

Xiiq-dheertu waxeey ugu badan tahay uguna halis badan tahay dhallaanka iyo carruurta ka yar 4 sano jir. Khatarta ugu badan waxay timaaddaa lixda bilood ee ugu horeysa noloshooda. Carruurta aan loo dhammeystirin tallaalka waxay khatar dheeraad ah ugu jiraan cudurka.

## Calaamaddaha iyo Astaamaha

- Qufac oo margado, matag, ama in neefta oo kudhegto inta ay qufacayaan
- Wajiga oo buluug u ekaada marka uu qofka qufaco (sabab la xiriirta neef la'aan)
- Neefsiga oo istaaga waqti gaaban (ama uu qofka joojiyo neefsashada muddo kooban)
- Matag kadib marka uu qofku qufaco
- Qufac badan oo uu la socdo xaakada qaroofan oo dhuuban oo aad u tiro badan
- Qufac oo si joogto ah u bata habeenkii ama isla marka hurdada laga tooso
- Qufac oo soconaya in ka badan 1 daqiiqo


©1987, Waxaa dib loo eegey 2025, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

## Marxaladaha Xiiq dheerta

Xiiq-dheertu waxay badanaa leedahay 3 weji marxaladood:

- Marxalada 1 aad: 2 ilaa 7 maalmood ee ugu horreeya, ilmahaaga wuxuu yeelaan doona calaamadaha hargabka, sida sanka qubanaya, hindhiso, iyo qufac khafiif ah. Waxaa jiro wax yar ama gabi ahaanba majirto wax qandho ah.
- Marxalada 2 aad: Inta u dhexeysa 7 ilaa 13 maalmood kadib astaamihii hore, ayaa ah marxaladda uu bilaaban karo "qufaca xiiq dheerta". Carruurta qaarkood waxa kaso baxa cod margasho leh halkii uu ka kasobixi laha cod xiiq dheer. Marxaladdan waxay socon kartaa ilaa 6 toddobaad.
- Marxalada 3 aad: Ilmahaagu waxa uu qufaci karaa ama 'xiiq dheereen karaa' isbuucyo ilaa bilooyin.

## Ka hortaga

- Xiiq-dheertu waxaa lagaga hortagi karaa iyadoo la adeegsanayo labadan tallaal:
  - **DTaP** (5 qiyaasood oo dhan)
    - 3 tallaal (qiyaasood) ayaa lagu taliyey in la siiyo marka ilmuhu gaaro 2, 4, iyo 6 bilood jir.
    - Waxaa lagula talinayaa in la siiyo 1 qiyaas da'da u dhaxaysa 15 ilaa 18 bilood.
    - Waxaa lagula talinayaa in mar labaad la siiyo 1 qiyaas 4 ilaa 6 sano jir.
  - **Tdap**
    - Waa tallaal xoojiye u ah DTaP.
    - Markii ugu horreysay waxaa la siiyaa carruurta da'doodu u dhaxayso 11 ilaa 12 sano. Ka dibna waxaa la siiyaa 10-kii sano mar.
    - Haddii aad uur leedahay, waa in lagugu duro tallaalka Tdap mar kasta oo aad uur yeelato. Tani waxay ka caawisaa in ilmaha uu helo difaac inta lagu jiro lixda bilood ee ugu horreysa noloshiisa.
- Kahortag faafitaanka jeermiska adigoo:
  - Baraya ilmahaaga in uu ku qufaco ama ku hindisoodo maro ama xusulka gacanta. Ee aan ku qufacin gacanta.
  - Baraya inay gacmahooda ku dhaqaan saabuun iyo biyo kadib marka ay qufacaan.

- Ku nadiifi boombalada ilmahaaga iyo walxaha kale saabuun iyo biyo ama jeermis-dile guriyeed (sida Lysol® ama Clorox®).
- In aan lisla wadaagin koobabka cabitaanka, fargeetooyinka, qaadooyinka,istiraashada, ama agabka kale ee qof ahaaneed.

## Goorta la wacayo 911

Wac 911 lambarka gargaarka degdegga ah ama tag qaybta gargaarka degdegga ah haddii ilmahaagu:

- Joojiyo neefsashada.
- Wajigiisu buluug isu beddelo marka uu qufaco.
- Qabo qalal.

## Daryeelka Guriga

- La joog ilmahaaga inta ay qufacayaan. La soco haddii neefsashada ilmaha ay ka sii darto, kadibna wac 911 haddii loo baahdo.
- Qalab sida buufis caag ama NoseFrida® ah u hay si aad uga saarto diifka ku jira sanka ilmaha.
- Markey timaado cuntada iyo cabitanka:
  - Sii canungaaga xad yar cunto iyo cabitaano ah marar badan.
  - Cabitaanada nadiifta ah ayaa caadiyan kafiican caanaha ama dareerayaasha nafaqada ilmaha. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah biyo, Pedialyte®, Gatorade® lagu qasay biyo, iyo maraq cad oo saafi ah.
  - Ilmahaagu wuxuu si fiican u cuni karaa cuntada kadib marka uu qufaco oo uu soo saarro xogaa xab.

## Daaweynta Dawooyinka

- Ilmahaaga waxaa loo qori karaa qalajiyaal si loo dilo jeermiska xiiq-dheerta. Had iyo jeer u sii ilmahaaga qalajiyaasha sida saxda ah ee loogu qoray.
  - Ilmahaagu wuxuu u ekaan karaa mid soo fiicnaanaya dhowr maalmood kadib. Haka joojin qalajiyaasha. U dhammee sida uu dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadku u qoray.

- Qof kasta oo guriga ku nool waa in uu sidoo kale qaataa qalajiyaasha. Tani waxaa badanaa qora isla dhakhtarka ama bixiyaha daryeelka caafimaad ee arkay ilmahaaga.
- Ha siinin ilmahaaga daawada qufaca ama hargabka adigoon weydiin dhakhtarka ama bixiyaha daryeelka caafimaadkooda. Ma caawineyso qufaca waxaana laga yaabaa inuu waxyeelo keeno.

- Dhakhtarka ilmahaaga ama bixiyaha daryeelka caafimaadku wuxuu kuu soo jeedin karaa daawo ka yareyso qandhadooda, sida acetaminophen (Tylenol®) ama ibuprofen (Motrin® ama Advil®).
- **HA** siinin ibuprofen caruurta ka yar da'ada 6 bilood.
- **HA** siin aspirin ama waxyaabaha ay aspirin-ka ku jirto carruurta da' kasta ha jirane.

## Goorta ay tahay in la Waco Dhakhtarka

Soo wac dhaqtarka canugaaga ama daryeel bixiyaha caafimaadka haddii ay qabaan:

- Qufac soodaraya (qufac dheer oo soo noqnoqda) xitaa kadib marka ay qaataan qalajiyaasha uu dhakhtarku qoray.
- Qandhada:

| Da'ada Carruur | Goobta Loo Geeynayo | Heer kululkooda |
|---|---|---|
| 3 bilood jir ama ka yar | • Malawadka (hoose) | 100.4° F (38° C) ama kasii badan |
| 3 jir billood ilaa 6 sano | • Jabka hore (xagga daanka madaxa)<br>• Malawadka | 102° F (38.8° C) ama kasii badan |
| 6 billood jir ilaa 3 sano | • Kilkilaha (ka hooseeya gacanta)<br>• Malawadka<br>• Dhegta (qeybta dhexe ee gudaha)<br>• Madaxa hore | 102° F (38.8° C) in ka badan 24 saacadood |
| 4 jir ama kaweyn | • Afka (afka)<br>• Dhagta | 102° F (38.8° C) in ka badan 3 maalmood |

**Wac haddii da' kasta ay qabaan qandho gaaraysa 104° F (40° C) ama ka badan.**

- Calaamadaha muujinaya in aadan cabin biyo kugu filan (fuuq bax):
  - Afka oo qalala ama dhegdhega
  - Ilin kama imanayso markey ooynayan


Sii socda…

- Aan kaadiyin ama aan lahayn xafaayad qoyan in ka badan 8 saacadood
- Meesha jilicsan ee madaxa oo godan ee carruurta ka yar 18 bilood jir
- Aad buu u daciif u tahay wayna adagtahay in la toosiyo

## Isbitaal Joogista

Ilmahaaga waxaa laga yaabaa in loo baahdo in isbitaal la seexiyo si ay u helaan daaweyn dheeraad ah. Tani waa dhif. Waxay ku badan tahay carruurta 6 bilood jir ah ama ka yar, sababtoo ah sambabadooda weli si buuxda uma soo korin. Inta aad isbitaalka ku jirtaan waxaa laga yaabaa in ilmahaaga la siiyo oksijiin dheeri ah, dareeraha xididka laga siiyo (IV), la socodka wadnaha, iyo taxaddar gooni ah si cudurka uusan ugu fidin dadka kale.

## Ku labashada iskuulka ama Xanaanada Maalinlaha

- Weydii dhakhtarka ama kalkaalisada caafimaadka marka uu cunuggu dib ugu laaban karo iskuulka ama xannaanada ilmaha.
- Carruurta aan qaadanin dawooyinka qalajiyaasha ah waa inay sugaan 21 maalmood laga bilaabo markii ay qufaca bilaabatay ka hor inta aysan iskuulka ku laaban.
- U sheeg iskuulka ama xarunta daryeelka carruurta in ilmahaaga uu qabo xiiq-dheer, iyo calaamadaha ay tahay in la fiiriyo. Xiiq-dheertu waa cudur la ogaan karo. Tani waxay ka dhigan tahay in waaxda caafimaadka ee deegaanka ay khasab ku tahay inay la socoto tirada dadka laga helay cudurka. Waalidiinta ama daryeelayaashu ma aha in ay iyagu si toos ah u soo sheegaan. Macluumaadka shakhsiga ah lama raadraacaayo.